

Ceeb iyo Eed

Inta badan bini'aadamku wuxuu dareemaa Eed, sida waxyaabo uu horey u sameeyey iyo inuu ceebsado qof ahaantiisa. Ceebsiguna waa ahaan karaa qofku wuxuu sameeyey. Kala saarista Ceebta iyo eeduna ma sahlana.

Inta badan dareenka ceebta iyo Eeduba waxaa gundhig u ah xeer ay bulsho sameysatey. Bini'aadamkuna waa u muhiim iney meel ka tirsan yihiin, noqdaana kuwo wax anfaca. Bulsho waxay leeyihiin dhaqan iyo xeer, taasoo qofkii jabiyana suurogal in la takooro. Dareemmista ceebta iyo eedeynta waxay ka dhalataa in, qofkii uu ku dhaqmo sida waafaqan xeerka bulshadu dhigatey. Ceebta iyo eedeynta waxay nagu beertaa dareen xoogan. Qofku suurogal markiiba inuu dareemo ceeb iyo eedba markuu la kulmo ama la socdo ruux uu yaqaaney.

Dareenka ceebta iyo Eeduba suurogal iney isku kaa raacaan ama mid uun labadooda, tusaale qoyska, qaraabada ama bulshada waxaaa dhici karta iney leeyihiin ooy ka siman yihiin ceebta ama Eedeynta, taasoo la qariyo meelnana aan lagu sheegin. Qolo walbaana waxay leedahay dhaqan u gaara, taasoo sababta ceeb iyo Eedeyn. Dhaqamada qaar wax u caadiya ayaa kuwa kale dhaqankooda ka reeban. Nidaamka bulshada waa mid had iyo goor is bedesha balse, si tartiiba isu badasho. Xitaa haddii niddaamku qaarkood yahay mid hore, waxaa suurogal iney bulshadii weli ku dhaqanto qaab barbaarin, diiniyan, iyo weji gabax ama ceeb kaaga timaada bulshadada.

Waa maxay ceeb?

Ceebta waxay leedahay dareen sharaf daro, wax matarnimo iyo libin la'aan. Qofku wuxuu ceebsan karaa wuxuu yahay, waxa uu sameeyey ama waxa lagu sameeyey. Ceebtu waxay ka dhalataa fikirka in "HADDII dadka kale ogaadaan tolow maxay ii maleyn doonaan aniga". Ceebsigu waa jiri karaa iyadoon xitaa ruux og jirin. Ceebtu wey ahaan kartaa xitaa adigoo naftaada ceebsadey. Ceebtu waxay kugu yeelan kartaa saameyn in fikirkaagu is buriyo sida qof sidee ah ayaad ahaan laheyd ama aad isu aragtaa inaad tahay. Waxyaabo badan baa ku xasuusiya ceebta sida, urta, ereyo, taabasho ama muuqa ruux kale.

Jlirka waxaa ku yimaada isbedel, markii aad ceebsato. daamankoo gaduuta iyo neefsigaaga oo isbedela. Inta badan qaabkaagoo noqda inaad hoos u hogoto. Waxaa suurogal ah iney kugu adkaato inaad fikirto iyo inaad dareento in adoo dhan inta lagu jajabiyey god lagu ridey. Waxaa laga yaabaa in ruuxu ka go' dadka kale. Ceebtu waxay ku keeni kartaa ruuxu inuu had iyo goor difaac ku jiro, taasoo ku keento inuu wuxuu dareemayey cid kale kula dul dhaco carada ama isagu naftiisa colaadiyo. Ma rabo bini'aadamku inuu u muuqdo dulmane inuu yahay ama ruux daciif ah dadka kale hortooda.

Haddii uu masiibo lasoo kulmey, tusaale awood loo sheegtey waxna loogu geystey taasoo inta badan ruuxu ceebsado, xitaa isagoon wax khalad ah sameyn. Haddii aad dareento amnidaro iyo waxyaabo xun oo lagu geystey waa hore, dareenka ceebtu waa mid joogto ah, kuna lamaan had iyo goor dareenka waxyaabaha kale.

Waa maxay eedeyn?

Bini'aadamku wuxuu isku eedaa arimo, maxaad sameysey oo khaldan ama isku arko inuu khaldad geystey. Eeda waxaad u dareemi kartaa sidii in lagaa maroojinayo caloosha, xabadka iyo maddaxa ama lallabo.

eedeyntu mararka qaar waa mid arini keento. Haddii dhab ahaantii aad sameyso khaldad, waana wax wanaagsan inaad ka garaabto falkaas ama aad raaligelin dalbato. Waana wax wanaagsan garashada falka aad geysato, aqbashana isla markaasna kuu noqota cashir in mustaqbalka aysan dhicin geysasho khaldad kale. Waad ka fikiri kartaa waxaad rabtey inaad sameyso. Inta badan qofku wuxuu ula jeedaa wanaag, balse had iyo jeer wixii sidii la rabey ma noqodaan.

Haddii ruuxu sameeyo khaldad, laakiin uusan heysan fursad kale. Eedu markaa uu dareemayo waa mid culus markii loo eego xaalada. Markaa wey wanaagsanaan laheyd in leys weydiyo cida wax ka awoodey xaalada. Yaa xaqiiqdii u sabab ahaa eeda? Fursadaha kalee bannaan mise waxay aheyd fursada keliya ee bannaan? Dhab ahaan majirtey si kaloo la yeeli karey mise khaldad bey aheyd geesashadu sababtoo ah inuu ku qasbanaa? Adigu ma yeeli laheyd sidaas oo kale, haddii aad og tahay waxa ka dhalanaya falkaas? Dadka iyagaa go'aanka qaata doortana waxay markaa fali lahaayeen marxalada markaas heysata. Inta badan waxaan dareenaa eed, xitaa inagoo wax u si wanaagsan dooraney sida ugu macquulsan ama xaqiiqdii aysan jirin wax kaloo la sameyn karey. Caadiyan haddii qof ehelkaaga wax ku dhacaan, waxaan dareenaa eed, xitaa inagoon sameyn wax khaldad ah.

Maxaa ku caawinaya?

Ceebta iyo eeduba waa suurogal inuu si xoogan ruuxu u dareemo kuna adakaato xalinta arinka u yaala balse uu is ilowsiiyo. Waxay ahaatoba, markii qofku kala sheekeysto dareenkiisa isagoo fahansan ruux kaloo la jooga, inta badan wuxuu dareemaa fuddeyd. Haddii ceebta iyo eeda dareenkooda aanan la xalin, waxay noqoneysaa mid caqabad kusii ahaato qofkii saameyna ku yeelata noloshooda. In wax uu la waddago ama la socdo dadka kale wey ku adkaataa, balse la joogista ama la socoshada dadka kale iyo aqbalistooduba waxay ka caawineysaa dareenka ceebta iyo eeda.

Ceebta iyo eeda waxaa kaa caawinayaa inaad kordhiso isku turida, uroonaato naftaada. Waxaanad ku baran kartaa tusaale inaad ku fikirto qoraal ahaan qortana "waxaan ahay ruux ku qanacsan siduu yahay" ama "Waxaan ahay ruux aqbaley wixii soo marey" ama "anigu denbiile ma ahi" Sharciyeyso dareenkaaga ceeb iyo eedaba waxaad maareysaa adigoo ku fikiraya xaalad wanaagsan qoofaad isku fiican tihii idin dhex martey. Haddii aad sidaa dareemi laheyd, maxaad rabi laheyd inaad tiraahdo? maxaad kula talin laheyd ama ku dejin laheyd?